Minneapolis
City of Lakes

# Su'aalaha inta badan la is weydiin karo wax ka bedelka sharciyada ciidanka nabadgelyada

## Waa maxay talo soo jeedinta la xiriirta arrintan?

Talo soo jeedinta waxaa ciidanka nabadgelyada laga wareejinayaa sharciyada magaalada iyaga oo hoos tagaya waax cusub oo lagu magacaabo amaanka bulshada iyo ka hortagga rabshadaha. Waaxdan cusub ayaa qabaneysa adeegyo balaaran oo la xiriirka amaanka dadweynaha "nidaam guud, oo ku wajahan caafimaadka dadweynaha". [Halkan ka akhri isbedelka la jeedinayo].

## Waa maxay nidaamka loo marayo su'aasha cod dhiibashada ee la xiriirta isbedelka lagu talinayo?

Sharciyada u degsan magaalada waa dastuurka magaalada. Laba hab ayaa jira oo isbedel loogu sameyn karo (isbedel) sharciyada. (1) cod dhiibashada dadweynaha (2) sharci ay soo saaraan Golaha Magaaladada iyo Duqa Magaalada. Golaha Magaaladu waxa uu ku talinayaa in sharciyada nabadgelyada dadaweynaha wax laga bedelo oo loo bandhigo dadwaeynaha si ay codkooda uga dhiibtaan 3da Nofeembar. Xog dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka [wax ka badalka sharciyada magaalada ka akhri ].

## Waa maxay doorka Gudiga Sharciyada Magaalada ka ciyaarayaan nidaamkan?

Gudiga Sharciyada magaalada door rmuhim ah ayey ku leeyihiin wax ka bedelka shacriyada. Dhacdadan oo kale, Gudiga Sharciyada magaalada waxaa laga doonayaa in ay dib u eegaan oo talo soo jeedin u soo gudbiyaan Golaha Magaalda. Asal ahaan, Gudiga Shaciayada waxaa laga yaabaa:

1. In ay taageeraan isbedelka sharciyada ee la soo jeediyey oo ay ku taliyaan in dadweynaha loo soo bandhigo si ay codkooda uga dhiibtaan oo go'aan uga gaaraan.
2. In ay diidaan isbedelka sharciyada ee la soo jeediyey oo ay ku taliyaan in dadweynaha loo soo bandhigo si ay codkooda uga dhiibtaan oo go'aan ka gaaraan.
   Ama
3. In ay soo jeediyaan "wax lagu bedel"—oo bedel u noqon kara talo soo jeedinta Golaha Magaalada—kaasoo Golaha Magaaladu dooran karo in loo bandhigo aftida dadweynaha.

## Waa ayo xubnaha Gudiga Sharci Dejinta Magaalada? Sidee ayaa lagu soo xulaa?

Gudiga Sharciyada Magaalada waxa uu ka kooban yahay 15 xubnood, waxaana dhamaantood magacaaba Gudoomiyaha Qaaliyada ee Degmada. Xubin kasta waxa ay shaqeysaa muddo afar sano ah. Kala soco [Commission's membership roster].

Minneapolis
City of Lakes

## Gudiga Sharciyadu ee magaaladu miyaa go’aan ka gaara hadii dadweynuhu codkooda ka dhiibanayaan?

Maya, Gudiga Sharciyadu waxa ay leeyihiin door muhim ah oo ka talo bixinta nidaamla, laakiin go’aanka ugu dambeeya waxaa legh Golaha Maamulka Magaalada oo go’aanka ka gaara in dadweynuhu cod ka dhiibanayo. Hase yeeshee, Golaha Maamulka Magaaladu ma soo gudbin karaan cod dhiibashada dadweynaha ilaa Gudiga Sharci Dajintu soo gudbiyo warbixintiisa oo wehliyaan talo jeedinta waxyaabaha ay ku talinayaan. Gudiga Sharci Dajintu waxa ay heystaan muddo 150 maalmood ah sida uu dhigayo sharciga gobolka in ay dib u eegaan oo ay ka doodaan talo soo jeedinta, laga bilaabo 1da Luulyo 2020.

## Golaha Magaaladu miyaa go’aan ka gaara hadii dadweynuhu codkooda ka dhiibanayaan?

Golaha Magaaladu ayaa go’aan ka gaara haddii daweynuhu codkooda ka dhiibayaan iyo sidoo habka loogu soo bandhigayo doorashada. Ka dib marka loo soo gudbiyo talo soo jeedinta Gudiga Sharciyada, oo iyada oo halka codku u bato lagu go’aamiyey, waxa ay qaadaan mid ka mid ah talaabooyinka soo socda.

1. In ay soo gudbiyaan talosoojeedintii u horeysay oo dadweynuhu codkooda ka dhiibtaan;
2. In ay soogudbiyaan talo soo jeedin “bedel” ah oo ay ku taliyeen guddiga sharci dajinta si loogu bandhigo dadweynaha; ama
3. In aan loo gudbin talo soo eedinta cod dhiibashada dadweynaha.

## Waa maxay doorka uu Duqa Magaaladu ku leeyahay talo soo jeedinta?

Sharciga Magaalada ayaa waajib ka dhigaya in talaabo kasta oo ay qaadayaan Golaha Magaaladu uu ogolaado ama diido Duqa Magaalada. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in go’aan kasta oo ay gaaraan Golaha Magaaladu ee ku saabsan in loo soo bandhigo cod dhiibashada dadaweynaha inuu ogolaado Duqa Magaalada. Haddii uu ogolaado Duqa Magaaladu, ka dib Golaha Magaalada ayaa dhaqan geliya oo u soo gudbiya cod dhiibashada dadweynaha.

## Waa maxay la doonayo in loo soo gudbiyo cod dhiibashada dadweynaha?

Sharciga gobolku waxa uu waajib ka dhigayaa in wax kasta oo loo bandhigayo in dadaweynuhu codkooda ka dhiibto la soo gudbiyo 74 cisho ka hor doorashada. Doorashada guud ee 2020 waxa ay ku beegan tahay 3da Nofeembar taasoo ka dhigeysa in la soo gudbiyo ugu dambeyn Jimcaha, 21ka agoosto. Haddii aan la soo gudbin taariikhda loo qabtay, laguma dari karo cod ka dhiibashada dadweynaha.

## Waa maxay tirada codka ee loo baahan si loo dhaqan geliyo wax ka bedelka sharciga?

Sharciga gobolku waxa uu waajib ka dhigayaa in 51 boqol dadka dhiibanaya codka ogolaadaan talo soo jeedinta lagu talinayo ee wax ka bedelka sharciga.

## Sidoo ayaa loo xisaabayaa (tirinayaa) tirada cod dhiibashada?

Cod dhiibashada ay ku cadahay HAA ama MAYA ee kaarka cod dhiibashada kaliya ayaa la tirinayaa si go'aan looga gaaro dhaqan gelinta talo soo jeedinta. Kaararka cod dhiibashada ee wax jawaab ah aan laga bixin—sida iyada oo su'aasha oo banaan laga tago—laguma darayo tirinta codadka. Marka dhamaan cod dhiibashada ay cadahay sida ay doonayaan la tiriyo, saraakiisha la doortay ayaa go'aan ka gaaraya in ugu yaraan 51% ay taageerayaan isbedelka lagu talinayo. Haddii ay sidaas u dhacdo, isbedelka waa la dhaqan gelinayaa.

## Haddii la dhaqangeliyo, goorma ayey dhaqan gelintiisu bilaabaneysaa?

Sharciga waxaa ka mid ah, in haddii ay dadweynuhu ogolaadaan ka dib marka ay codkooda dhiibtaan, waxa uu dhaqan galayaa 1da May 2021.

## Haddii uu dhaqan galo, siduu noqonayaa mustaqbalka Qeybta Booliska?

Haddii uu dhaqan galo, waaxda boliiska waa laga saarayaa sharciyada magaalada. Taasi micnaheedu ma aha in aysan magaaldu yeelan doonin qeybta booliska, kaliya waxa ay ka dhigan in aysan ka mid noqon doonin sharciyada u degsan magaalada—dastuurka Magaalada. Su'aasha ku saabsan aayaha ciidanka booliska ee iminka jira waxaa go'aankeeda leh Duqa Magaalada iyo Golaha Magaalada.

## Haddii uu dhaqan galo, weli Minneapolis ma yeelaneysaa ciidan ilaaliya nabadgelyada?

Haddii uu dhaqan galo, weli Magaalada Minneapolis way qoran kartaa ciidanka nabadgelyada (kuwaa lagu magacaabo "saraakiisha amaanka" sida ay dhigayaan sharciyada gobolka). Talo soo jeedintan meesha kama saareyso in Magaaladu sii heyso ciidanka nabadgelyada. Run ahaantii, talo soo jeedintan waxa ay si gaar ah si cad u kala saareysaa adeegga cusub ee bulshada iyo ka hortagga rabshadaha ee waaxdan oo xoogga saareysa fulinta sharciga ee saraakiisha ciidanka ee heysta ogolaashaha gobolka. Go'aankaas waxaa leh Duqa Magaalada iyo Golaha Magaalada.

## Haddii uu dhaqan galo, yaa maamulaya waaxda cusub?

Talo soo jeedintu waxa ay ku talineysaa in madaxa waaxda oo si wadajir ah ay u magacabayaan Duqa Magaalada iyo Golaha Magaalada ay hoos timaado qeybta. Talo soo jeedintui waxa ay si gaar ah u tilmaameysaa in dadka loo tixgelinayo in ay madax ka noqdaan qeybtaas aysan "horey uga tirsaneyn ciidanka nabadgelyada kuwaa oo ay ka mid yihiin laakiin aan ku koobneyn shaqaalaha caafimaadka dadweynaha iyo nidaamka dib u soo celinta garsoorka"

## Waa maxay waaxda ka tirsan sharciyada magaalada? Waa qeybahee kuwa hoos yimaada (xusan) sharciyada magaalada?

Qeybaha magaaladu waa laba nooc: kuwao ku xusan sharciyada magaalada iyo kuwa aan ku xusneyn sharciyada magaalada. Hay'adaha ku xusan sharciyada magaalada waa kuwa qabta adeegga aasaasiga ah, sida amaanka dadweynaha, caafimaadka dadweynaha iyo hawlaha guud. Hay'adaha aan sharciyada magaalada ku xusneyn waa kuwa taageerada u ah hawlgalada oo

taageera hawlaha magaalada. Madaxda Waaxyaha ku xusan sharciyada magaalada waxaa si wadajir ah u magacaaba Duqa Magalaada iyo Golaha Maamulka Magaalada. Madaxda waaxyaha aan ku xusneyn dastuurka magaalada waxaa magacaaba oo ay hoos yimaadaan xiriiryaha magaalada. Waxaa jira toban waaxyood oo hoos yimaada dastuurka magaalada,waxayna kala yihiin: Qiimeeyaha Magaalada; Xeer Ilaaliyaha Magaalada; Xiriiryaha Magaalada; Xuquuqda Aadanaha; Qorsheynta iyo Horumatinta Dhaqaalaha; Dab damiska; Caafimaadka; Booliska; Hawlaha Guud; iyo Adeegga Sharciyada.

## Ma lagu sameeyey daraasad xagga sharciga ah isbedelka lagu talinayo oo la heli karo?

Laguna sameyn daraasad xagga sharciga ah isbedelka lagu talinayo. Gudiga Sharciyada Magaalada ayaa ka codsaday Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada in ay diyaariyaan daraasad xagga sharciga ah oo qeyb ka noqoneysa dib u eegista talo soo jeedinta.

## Waa maxay raadka maaliyadeed oo ay yeeleneyso abuuritaanka Waaxda Amaanka Bulshada & Ka Hortagga Rabshadaha?

Laguna sameyn daraasad raadka maaliyadeed isbedelka lagu talinayo.

## Waa maxay raadka isku dhafka qowmiyadaha oo ay yeeleneyso abuuritaanka Waaxda Amaanka Bulshada & Ka Hortagga Rabshadaha?

Laguna sameyn daraasad la xiriirta isku dhafka bulshada ee isbedelka lagu talinayo.

## Sidee ayaan ra'yigeyga ugu soo gudbin karaa Duqa Magaalada iyo Golaha Magaalada ee isbedelka lagu talinayo?

Ra'yigaaga u soo gudbi Duqa Magaalada ama Ra'yigaaga u soo gudbi Golaha Magaalada. Ra'yiga aad ka dhiibato waxa uu qeyb ka noqonayaa diiwaanka dadweynaha.